



DHILQO

Warqadda xaqiiqada



WAA MAXAY DHILQUHU?

Dhilquhu waa cayayaan yaryar, cawlaan ah cabbirkiisuna yahay miraha tufaaxa oo kale marka uu weyn yahay kaas oo jaqa dhiigga bini'aadamka. Marka uu dhiigga jaqo kadib, wuu weynaadaa cabbir ahaan wuxuuna yeelan karaa midab gaduud daran ah ama ifaya. Dhilquhu baalal ma laha mana duuli ama boodi karo. Waxaa badanaa laga helaa meelaha dadku seexdo.

SIDEE BUU DHILQUHU U SAAMEYN KARAA CAAFIMAADKEYGA?

Ma jirto xaqiiqo muujineyso in dhilquhu ku faafiyo cudurada bini'aadamka. Waxaa jiro habab badan oo ay qaniinyada dhilquhu saameyn u leedahay, laga bilaabo saameyn la'aan ilaa nabarro cascacs oo cuncun leh. Haddii dhilqaha la arbusho iyagoo ku jaqayo, waxaa dhici karto in uu qaniino halmar wax ka badan isla halmeel taas oo keeneeyso dhowr qaniinyo oo isku dhow dhow. Qaniinyadu wax xanuun ah ma lahan laakiin waxaa dhici karto in ay ku cuncunto hal ama labo maalmood kadib. Xoqitaanka meesha la qaniinay waxay keeni kartaa infagshan. Dad badan ayaa welwela oo walbahaara markii ay arkaan dhilqaha.

WAA SIDEE QAAB NOLOLEEDKA DHILQAHAA?

Waxaa jiro seddax marxaladood oo ay marto noloshu dhilqaha: ugxaan, nymphs'ka (ama yaryar) iyo waaweyn. Ugxantu waxay leedahay dahaar ka caawiyo in ay ku dhegaan meel waxayna badanaa ku fiqmaan lix ilaa 17 maalmood. Yaryarka fiqmay waxay bilaabaan in ay wax jaqaan isla markiiba. Dhilqaha waaweyn waxay noolaan karaan in ka badan 12 bilood, iyadoo ku xiran xaaladaha goobta iyo bii'ada, waayo waxay noqon karaan tacbaan markii ay waayaan wax ay jaqaan.

SIDEE DHILQUHU OO NOOLAAN KARAA?

Dhilqaha waaweyn wuxuu badanaa ku nool yahay oo uu jaqaa dhiiga bini'aadanka kaas oo uu u isticmaalo inuu soo saaro ugxaan. Midka yaryar wuxuu u baahan yahay dhiig uu jaqo si uu u noqdo dhilqo waaweyn. Dhilquhu wuxuu badanaa dhiigga jaqaa seddax ilaa 15 daqiiqo, iyadoo ku xiran hadba marxaladda uu marayo. Marka uu dhiiga jaqo kadib, dhilquhu waxay galaan meelaha ay isku qariyaan taas oo badanaa u dhow halka ay seexdaan.

SIDEE BUU DHILQUHU KU GELI KARAA GURIGEYGA?

In gurigaaga dhilqo joogo macnaheedu ma aha in uusan gurigaagu nadiif aheyn oo aan si fiican loo ilaalin. Dhilquhu wuxuu la safri karaa waxyaalaha sida xamuulka iyo qalabka guryaha oo kale ama alaabta

SIDEE BAAN KU OGAAN KARAA HADDII GURIGEYGU DHILQO LEEYAHAY?

Calaamadaha muhiimka ah ee dhilqaha waxaa ka mid ah:

- Korkaaga oo lagu arko qaniinyo aan la ogeyn iyo nabarro cascacs.
- Geesaha sariirta, joodariga ama isbiriinka.
- Xuubka dhilqaha yaryar.
- Dhilqo nool ama meyd ah.

Haddii ay joogaan dhilqo fara badan, waxa jiri karo, shiir ama ur cartan leh, sida kabsarta oo kale.

guryaha oo meel laga qaado meelna loo raro. Tan ugu caansan waxaa weeye joodariyada, isbiriinka, qalabka jiifka, alaabta guryaha, elektaroonikiska, buugaagta ama sawirada.

SIDEE BAAN UGA HORTEGI KARAA IN DHILQUHU SOO GALO GURIGEYGA?

Habka ugu wanaagsan ee lagula tacaali karo dhilqaha waa in laga ilaaliyo in uu gurigaaga soo galo.

- Ka eeg dhammaan alaabta la soo isticmaalay in ay wataan dhilqo ama ugxanta dhilqaha.
- Marka aad safar tahay, si fiican isaga baar qolkaaga, gaar ahaan joodariga, aasbiriinka iyo armaajada. Ka eeg dhilqo nool, ugxanta dhilqaha, iyo dhibco madmadow ama walxo u eg sida filfisha.
- Dhig alaabtaada meesha alaabta la dhigto oo ka fog joodariga, gudaha saxniga qubayska ama iyadoo ku jirto bac.

Marka aad guriga ku soo noqoto, haddii ay suurtagal tahay:

- Ku nadiifi alaabtaada vacuum'ka kuna rid qashinqaadaha vacuum'ka bac, xir kadibna dibadda dhig si looga qaado.
- Ku dhaq dhammaan dharkaaga wasaqda ah biyo kulul kadibna qalaji adigoo isticmaalayo qalajiyaha kulul.
- Ku rid dhammaan dharkaaga nadiifka ah qalajiyaha kulul. Qalajiyaha caadiga ah wuxuu shaqeeyaa ugu yaraan 15 ilaa 20 daqiiqo isagaa ku socda dhexdhexaad ilaa diirimaadka sare taas oo dili karto dhammaan dhilqaha heerarkiisa kala duwan.
- Qaboojinta saa'idka ah way yareyn kartaa dhilqaha laakiin ma aha hab tayo leh oo lagu dilo ugxanta dhilqaha.



CABIRKA CAADIGA AH (QAANGAAR AAN LA QUUDIN)



Winnipeg Regional Health Authority
Caring for Health

Office régional de la santé de Winnipeg
À l'écoute de notre santé



DHILQO

Warqadda xaqiiqada

SIDEE BAAN ISAGA ILAALIN KARAA DHILQAHA?

Iska ilaalinta dhilqaha aad ayay ugu adag tahay milkiilayaasha guryaha. Haddii aad is leedahay dhilqo ayaa gurigaaga ku jiro, ku xir sharooto labada dhinac xabag ku leh lugaha sariirta ama sagxadda ku xeeran sariirta. Haddii dhilqo laga helo:

- Ku nadiifi vacuum'ka ama nadiifiyaha diirran sagxadda, dildilaacyada, daloolyada, baseboards'ka iyo roogagga.
- Ku rid dharka iyo go'yada sariiraha qalajiyee kulul ugu yaraan 15 ilaa 20 daqiiqo. Ku xir walxaha nadiifka ah bac ilaa howshu ka dhamaaneyso.
- Ku xir dahaarka dhilqaha joodariyada hana ka furin.
- Isticmaal kiimikooyinka la buufiyo, boor ama budo laga keenayo dukaamada oo u diiwaangashan isticmaalka dhilqaha. Aqri warqadda la socoto ka dibna tilmaanta si taxadar leh u raac. BADEECO kale oo badan looma baahno.
- Wac tijaabiye. Dad badan ayaa hadda isticmaalo kula tacaalidda kuleylka oo lagu daray tan kiimikaaliska. Qof xirfad leh ayaa fahmi karo sida loo isticmaalo badeecooyinka kala duwan iyo hababka ugu fiican si natiijo fiican loo helo.

YAA MAS'UUL KA AH XAKAMAYNTA DHILQAHA?

Haddii aad gurigaaga leedahay, adiga ayaa mas'uul ka ah ka ilaalinta dhilqaha. Haddii aad kiro ku deggan tahay, milkiilaha guriga waa in uu guriga ka ilaaliyaa dhilqaha. Si la isaga ilaaliyo dhilqaha milkiilaha guriga iyo kireystaha waa in ay ka wada shaqeyaan arrintaas. Milkiilaha guriga waa in uu diyaariyaa qofka baaritaanka sameynayo waana in uu u sheegaa kireystaha waqtiga uu qofka baaritaanka sameynayo imaanayo iyo sida loogu diyaarinayo qeybta kireysan baaritaanka. Waxaa aad muhiim u ah in uu kireystuhu raaco tusmooyinka milkiilaha ee la xiriiro sida loo diyaarinayo qeybta kireysan wax ka qabashada ka hor iyo ka dib. Kireystuhu waa in uu u ogolaado qofka baaritaanka sameynayo in uu galo guriga si baaritaanka loo dhameystiro.

Wixii tusmooyin ah ee la xiriira sida loo diyaarinayo qeybta aad guriga ka degan tahay eeg barta internetka ee Dowladda Manitoba ee hoose wixii faahfaahin dheeraada ah.

XIDHIIDHADA:

MAAMULKA CAAFIMAADKA GOBOLKA WINNIPEG:
www.wrha.mb.ca/healthinfo/a-z/files/BedBugs.pdf

MAGAALADA WINNIPEG:
www.winnipeg.ca/publicworks/bugline/insect_information/bedbugs.stm

DOWLADDA MANITOBA:
www.manitoba.ca/bedbugs